# Codsashada Adeegyada

(https://www.tn.gov/humanservices/for-families/supplemental-nutrition-assistance-program-snap/applying-for-services.html)

Haddii boggan aad caawinaad ugu baahan tahay sababo la xiriira naafanimo ama aadan ku hadlayn luqadda Ingiriiska awgeed, waxaa laguu diyaariyay kaalmo. La soo xiriir Lambarka Xarunta Adeegga Gaargaarka Qoyska (Family Assistance Service Center) oo ah taleefanka 866-311-4287 iyo/ama lambarka Qadka Dadka Maqalka ku Adag (TTY) oo ah 711. Farriinta duuban kadib, waxaad lagu xiri doonaa shaqaalaha howl-wadeenka oo kugu xiri kara turjumaan.

## Waa maxay SNAP?

Barnaamijka Gargaarka Nafaqada Kabka (SNAP) waa hindise Waaxda Beeraha ee Mareykanka (USDA) oo ay maamusho Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Tennessee (TDHS) taasoo kaalmo nafaqo siisa qoysaska u qalma. Manfacyada SNAP waxaa lagu soo diraa oo looga baxsadaa qaab elektaroonig ah iyadoo la isticmaalayo Kaarka Manfaca ama Kaaka EBT Card wixii macluumaad dheerad ah click here.

Dadka qaata SNAP waxay la siiyaa manfacyo loogu talagalay ee wakhti go'an oo loo yaqaan xilliga caddaynta. Rajadeenu ayaa waxay tahay in dhamaadka muddada caddaynta, aad gaari doonto heer aad isku filnaato, kobciso oo aad awoodo inaad daryeesho qoyskaaga adiga oo aan helin taageero dibadeed. SNAP waa mid ka mid ah adeegyo badan oo ay bixiso waaxda TDHS ee kaa caawin kara inaad gaarto yoolalkan. Si aad wax badan uga baratoo barnaamijyada kale ee TDHS, Riix Halkan.

## Sida loo Codsado SNAP

Waxaad ku codsan kartaa SNAP adiga oo qatka ku soo buuxiya oona soo gudbiya codsiga SNAP onlayn markaad Riix Halkan **AMA** waxaad soo gudbin kartaa codsiga oo daabacan adiga oo soo geliya ama foormka oo daabac boostada ayaad ku soo diri kartaa.

(Codso Batoonka Qatka Tooska ah ee SNAP) (Batoonka (Upload) faylka SNAP) (La Xiriir Batoonka Xafiiska TDHS)

**Si aad u hesho arji oo daabacan waxaad ula Xiriiri Xafiiska deegaankaaga si codsi boosta laguugu soo diro ama waxaad isticmaali kartaa linkiyada hoose si aad u soo degsato codsiga SNAP oo ku qoran luqadda aad adiga doorato.**

**Linkiyada codsiga SNAP:**
Codsiga Ingiriisiga (HS-0169) - English Addendum - Tilmaamaha Ingiriisiga - Tilmaamaha Ingiriisiga lifaaqa
Solicitud en Español (HS-0169) - Apéndice iyo Español - Tilmaamaha gudaha

Español - Apéndice de Instrucciones iyo Español
ملحق التعليمات العربية - الملحق العربي - ستمارة الطلب العرب yaa
Arji Soomaali - Tilmaamaha Soomaali - Tilmaamaha Wax lagu daray Soomaali

***Markaad buuxiso codsigaga kadib, waxaad haysataa saddex dka la xulasho oo aad ku soo gudbinayso codsiga SNAP ee daabacan (mid dooro):***

- ***Soo geli*** *Codsigaaga ama dukumentiyadaada qatka soo gelie, Halkan Riix.*
- ***Boostada*** *arjigaaga ama nuqdooyinka dukumentiyadaada ku soo dir: Family Assistance Division Department of Human Services P.O. Box 620001 Memphis TN 38181.*
- *Codsigaaga u soo gudbi xafiiska DHS ee degmadaada. Halkan Riix si aad u hesho xafiiska deegaankaaga.*

***Fadlan ogaaw: Waxaa dhici karta in xafiisyada TDHS laga yaabaa inay u degsan yihiin talaabooyin badbaado oo COVID-19 ah. Waxaan kula talineynaa in dhammaan macaamiisha soo galaya dhismayaasha dowladda Gobolka inay qaataan taxaddarada COVID-19 iyada oo loo eegayo xaaladdooda caafimaad. U diyaargarow inaad ka jawaabto su'aalaha la xiriira suurtagalnimada COVID-19 soo-gaarista, oo raac tilmaamaha masaafo kala fogaanshaha bulshada ee loogu talagalay kuwa soo booqda iyo shaqaalaha.***

## Waxa la filayo markaad soo codsanayso SNAP

Buuxinta codsiga SNAP ayaa ah talaabada ugu horeysa ee aad ku biirayso barnamijka SNAP oo aad bilowdo safarkaaga gaarida isku filnaansho. **Dukumeenti iyo foomam dheeraad ah ayaa loo baahan yahay si loo helo loona sii wado qaadashada manfacyada SNAP.** Badanaa dukumeentiyada caddaynta aqoonsigaaga ayaa loo baahan yahay si loo oggolaado barnaamijka SNAP. Caddaynta waxaa ku jiri kara caddaynta soo socota:

- **Lambarka Badbaada Bulshada** (Tusaale ahaan: Social Security Card)
- **Aqoonsigaaga** (Tusaale ahaan: shatiga darawalnimada, aqoonsiga iskuulka oo leh sawir, baasaboor, kaarka shisheeyaha ee degnaanshaha, kaarka I-94, kaarka diiwaangelinta cod-bixiyaha)
- **Halka aad ku nooshahay** (Tusaale ahaan: heshiiska kirada, biilka korontada, biilka telefoonka, ama shatiga darawalnimada oo cinwaankaaga ku qoran)
- **Dakhli iyo Hanti** (Tusaale: jeegga dabadiisa, warqadda loo shaqeeyaha, waraaqaha abaalmarinta)
- **Kharashka guriga** (Tusaale: bixinta deynta guriga, canshuurta guryaha, ceymiska guriga, risiidka ijaarka, heshiiska kirada)
- **Kharashka isticmaalka adeegyada** (Tusaale: biilka korontada, biilka biyaha, biilka gaaska)

## Talaabo-Tallaabada lagu Helayo oo loo sii Qaadanayo SNAP

Tallaabooyinka loo baahan yahay si loo codsado oo loona ilaaliyo qaadashada SNAP waxay ku saleysan yihiin heerka SNAP. Heerka barnaamijka waxaa lagu saleeyaa aqalka qoyskaaga iyo xaaladda dakhliga. **Heerka qoyska ayaa go'aamin doonta haddii dukumeenti dheeraad ah ama foomam loo baahan yahay si ay manfacaha SNAP u sii socoto oggolaanshaha hore kadib.** Isticmaal liiska sifada SNAP iyo macluumaadka la xiriira ee hoose ku qoran si aad u go'aamiso tillaabooyinka la qaadayo si loo codsado oo ay u sii socoto ku habboonaanta ku salaysan sifida qoyskaaga.

### Sifiiyinka SNAP:

***Sifada soo Sheegida La Fududeeyay - Caddayna 12-ka-bilood:***

Commented [DS1]: Insert corresponding translated checksheets here.

***Soo Sheegida la Fududeeyay - Caddaynta 24ka-bilood (Shaqsiyaadka Duqowda iyo Shaqsiyaadka Naafada ah):***

***Soo Sheegida la Fududeeyay – Caddayn Afar ilaa Lix Bilood:***

***Caddaynta Soo Sheegida Afarta-Bilood:***

***Soo Sheegida 10-ka bilood:***

## Tallaabooyinka Badbaadada ee COVID-19

**FADLAN OGSOONAW:** Maadaama uu jiru taxaddarro la xiriira cudurka COVID-19 ee ku saabsan kala fogaanta bulshada, qaybta hire ee xafiiska DHS ayaa kaliya loo diyaariyay **macaamiisha ballanta leh.** Dhismayaasha dawladda Gobolka, oo ay ku jiraan xafiisyada TDHS ee xaafaddaada, waxa laga yaabaa inay u degsan yihiin sharciyo taxaddar badbaado ee COVID-19 la xiriira. Waxaan kula talineynaa dhammaan macaamiisha soo galaya dhismayaasha dowladda Gobolka inay ku dhaqmaan taxaddarrada COVID-19 iyadoo loo eegayo xaaladdooda caafimaad iyo tasiilaadka aaladaha internetka lagu qabsan karo si aad u hesho adeegyada TDHS.

## Ma Qabtaa Su'aalo ku Saabsan SNAP?

Haddii aad qabto su'aalo, jawaabaha ku saabsan SNAP waxaad si sahal aad ku heli kartaa adiga oo qatka gala ama aad soo wacdo.

**Booqo Bogga Su'aalaha Kaalmada Qoyska**
Hel jawaabo badan oo aad raadinayso marka aad booqato Halkan Riix.

**Isticmaal Case Connect**
Waxaad ka heli kartaa macluumaadka ku saabsan kiiskaaga markaad gasho barteen CaseConnect ama Koontada TDHS eebarta

**La Sheekayso**
Ava, Kaaliyaha Tooska ah ee Waaxda Adeegga Aadanaha ee Tennessee ayaa ku toosin kara jawaabaha su'aalahaaga badan oo ku siin kara meelaha lagala xiriiro si aad ula hadasho shaqaalaha TDHS oo aad kala hadasho wax kiiskaaga ku saabsan. Ka raadi sawirka "Chat with Ava" dhanka middig ee hoose ee boggan si aad u sheekeysato oo aad u hesho jawaabaha aad u baahan tahay.

**Wac Xarunta Adeegga Qoyska**
Taleefanka: 866-311-4287

**Waxaad naga helaysaa baraha Bulshada ee @TNHuman**
wixii soo Cusboonaada waxaan idinkula wadaagaysnaa boggaga warbaahinta

bulshada iyo fariimaha. naga raadi Facebook, LinkedIn, ama Twitter si aad u ogaato wararka ku saabsan barnaamijyada TDHS, ama booqo our Youtube fiidyowyo xog ogaal ah oo ku saabsan barnaamijka TDHS.

**La xiriir Xafiiska Deegaankaaga**

TDHS waxa ay leedahay xafiisyo ay ugu adeegto dhamaan 95 ka degmo ee Tennessee waxaana lagala xiriiri karaa taleefanka ama waxaad ku booqan kartaa adiga oo ballan ka samaysata.  Si kastaba ha ahaatee, qaar badan oo ka mid ah xafiisyadan waxay leeyihiin tallaabooyin badbaado oo loogu hortagayo cudurka COVID-19 ah waxayna u xiran tahay dadka imaanaya ama "taraafikada." Halkan Riix si aad wax badan uga ogaato taxaddarrada COVID-19 Halkan Riix liiska goobaha xafiiska TDHS.

**Ma u Baahan tahay Caawimo ka Baxsan SNAP?**

Waxaa dhici karta in aad u qalanto barnaamijyo kale ee taageero ah oo ay maamusho TDHS.  Halkan ku dhufo liiska barnaamijyada TDHS ama Halkan Riix si aad u hesho Bixiyaha Xalka Lagu Bartilmaameedsado Qoyska ee kuu Dhow halkan.